XEERKA 3.96 - XAFIISKA KA QAYB QAADASHADA EE XAAFADDA

(Xeerka waxaa la beddelay iyada oo la raacayo Sharciga Tirsigiisu tahay 179418, ee dhaqan galay 12, 2005-kii.)

Qaybaha:

3.96.010 Ujeedada.
3.96.020 Sharaxaado.
3.96.030 Ururada Xaafadda.
3.96.040 Shaqooyinka Isbahaysiga Degmada.
3.96.050 Mas'uuliyada Hay'adaha Magaalada.
3.96.060 Mas'uuliyadaha Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda.

3.96.010 Ujeedada.

Xeerkani wuxuu abuurayaa qaab ay dadka Magaalada Portland ay si waxtar leh uga qayb qaadan karaan arrimaha bulshada iyo shaqada si loo wanaajiyo tayada nololeed iyo dabeecada Xaafadahooda iyo Magaalada. Xeerkani wuxuu sharaxaad ka bixinayaa aasaaska loogu talagalay aqoonsiga Magaalada ee Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada, iyo mas'uuliyadaha iyo faa'iidooyinka ku soo kordhay taasi. Xeerkani wuxuu sidoo kale sharaxaad ka bixinayaa aasaaska loogu talagalay aqoonta magaalada ee Ururada Ganacsiga ee Degmada iyo mas'uuliyadaha iyo faa'iidooyinka ku soo kordhay taasi. Xeerkani wuxuu sidoo kale abuurayaa Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda wuxuuna sharaxaad ka bixinayaa shaqooyinka, waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha. Ma aha wax ku jira Xeerkani in uu xaddido xuquuqda qof ama kooxda u leedahay in ay si toos ah uga qayb qaataan nidaamyada go'aan gaarida ee Guddiga Magaalada ama hay'ad kasta oo Magaalada ah.

3.96.20 Sharaxaado.

Sida lagu isticmaalay Xeerkani shuruudaha soo socda waxay leeyihiin macnaha lagu siiyay Qaybtan.

A. **Xaafadda:** Oo ah bulsho is-xulatay oo deegaan ahaan xuduud wadaaga.

B. **Ururka Xaafadda:** Oo ah Urur madax bannaan oo ay dadku abuureen oo ujeedada laga leeyahay tahay ka fikirka iyo wax ka qabashada arrimaha saameynaya tayada nololeed iyo tayada Xaafadooda, oo hore loogu yaqaanay Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda, isla markaana, waana mid uuu saameynayo Xeerka 3.96.

C. **Isbahaysiga Degmada:** Oo ah Urur taageera ka qayb qaadashada adeegyada loogo talagalay Ururada Xaafadda iyo qof kasta oo ku nool meel degaan ahaan la qeexay, isaga oo ah mid uu saameynayo Xeerka 3.96.

1. Isbahaysiga Degmada Aan Faa'iido Doonka Ahayn: Oo ah Hay'ad madax bannaan oo aan faa'iido doonka ahayn oo ay maamulaaan guddi inta badan ka kooban wakiilo ka socda xubnahiisa Ururada Xaafadda.

2. Isbahaysiga Degmada ee Magaalada U shaqeeya: Oo ah xafiis qayb ah ahaan ama si buuxda ugu shaqeeya shaqaalaha Magaalada si ay bixiyaan adeegyada xaafadda sida ay kula taliyeen Ururada Xaafadda ka qayb qaadanaya.

D. **Ururka Ganacsiga ee Degmada:** Oo ah urur madax bannaan oo aan faa'iido doonka ahayn oo leh tilmaamaha xubinimada oo ku qoran sharciyadiisu oo ay abuureen dad ganacsi ku leh degaan xuduud ahaan qeexan ujeedada laga leeyahay tahay kor u qaadida wanaaga guud ee bulshadooda ganacsi. Ururka Ganacsiga ee Degmada waa mid uu saameynayo Xeerka 3.96.

E. **Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda:** Oo ah hay'ada ay leedahay Magaalada Portland, oo ujeedadiisu tahay in uu fududeeyo ka qayb qaadashada muwaadiniinta iyo wanaajinta xiriirka ka dhexeeya muwaadiniinta, Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada oo aan faa'iido doonka ahayn/Isbahaysiga Degmada ee Magaalada u shaqeeya, hay'adaha Magaalada, iyo hay'adaha kale. Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda waa mid ay saameynayaan Heerarkani

F. **Ha'yada Magaalada**: Waxaa ku jira dhammaan waaxyaha, xafiisyada maamulka, xafiisyada caadiga ah, guddi iyo guddiga Magaalada Portland.

G. **Heerarka:** Xeerar ay ansixisay Guddiga Magaalada oo lagu maamulo Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada, Ururada Ganacsiga ee Degmada iyo Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda.

3.96.30 Ururada Xaafadda.

A. **Heerarka ugu yar ee loogu talagalay Ururada Xaafadda.** In ay helaan isla markaana ilaaliyaan aqoonsiga rasmiga ah, Ururada Xaafaddu waa in ay buuxiyaan Heerarka u yaala ka qayb qaadashada dadweynaha ee xaafadda.

B. **Shaqooyinka Isbahaysiga Xaafadda**. Ururka Xaafaddu way ka qayb qaadan karaan, laakiin kuma koobna kuwa soo socda:

1. Soo jeedinta talada(talooyinka) la xiriira tallaabo, siyaasad ama arrin kale oo gaar ah loo soo jeedinayo hay'ad kasta oo Degmo kaasi oo ku saabsan mawduuca saameynaya tayada nololeed, ammaanka iyo nolosha Xaafadda, oo ay ka mid yihiin balse aanay ku koobnayn isticmaalka dhulka, guryaha, xarumaha bulshada, kheyraadka dadka, barnaamijmada bulshada iyo madadaalada, isku socodka gaadiidka iyo gaadiidka, tayada degaan iyo amaanka dadweynaha; iyo,

2. Ka caawinta hay'adaha Magaalada go'aaminta baahiyaha mudnaanta leh ee Xaafadda; iyo.

3. Dib u eegida waxyaabaha loogu talagalay ka mid noqoshada miisaaniyadda Magaalada iyo samaynta talooyinka la xiriira waxyaabaha miisaaniyadda ku saabsan ee loogu talagalay wax wanaajinta; iyo,

4. Qaadashada mashaariicda iyo hawlaha ay Ururada Xaafaddu u arkaan in ay wax ku habboon yihiin; iyo,

5. La shaqaynta Ururada Xaafadda iyo ONI si loo sameeyo Isbahaysiga Degmada.

C. Mas'uuliyadaha Ururada Xaafadda.

1. Ururada Xaafaddu waa in ay u hoggaansamaan Heerarka la raacayo ee uu dejiyay Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda.

2. Ururada Xaafaddu waa in ay sameeyaan dadaal macquul ah si hay'adaha Magaalada ee saameysay loogu daro hawlaha wax qorsheynta ee saameynta ku yeesha tayaha nololeed ee Xaafadda.

D. Faa'iidooyinka ay u leedahay Ururada Xaafadda.

1. Ururka Xaafadda oo kasta oo buuxinaya shuruudaha ugu yar ee lagu dejiyay 3.96.030, marka la codsado, waxay xaq u leeyihiin aqoonsi rasmi ah iyo faa'iidooyin ay ka helaan Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda iyada oo la raacayo Heerarka yaala ee la ansixiyay.

2. Haddii Ururka Xaafaddu ku guuldareysto in uu buuxiyo shuruudaha ugu yar of 3.96.030, Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda waxaa laga yaabaa, isaga oo raacaya Heerarka yaala, in uu joojiyo qayb ahaan ama dhammaan faa'iidooyinka ay helayaan Ururka Xaafaddu isla markaana laga yaabo in ugu dambeyntii lagala noqdo aqoonsiga rasmiga ah ee Urur Xaafadeedka.

3.96.40 Shaqooyinka Isbahaysiga Degmada.

Isbahaysiga Degmadu waa in ay:

A. Tababar iyo hanuunin, macluumaad iyo taageerada dhanka adeegyada siiyaan Ururada Xaafadda ee ka dhex jira meelaha Ururada Xaafadda u adeegaan;

B. Fududeeyaan xiriirka ka dhexeeya dadka iyo dowladda;

C. Dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada dadweynaha ee ka dhex jira meelaha Xaafaddu u adeegto ee ku saabsan arrimaha dhanka tayada nololeed, ammaanka iyo siyaasadda dadweynaha;

D. Horumariyaan, dhiirigeliyaan isla markaana taageeraan ka qayb qaadashada xubnaha ka tirsan bulshooyinka ka duwan ee ka dhex jira meelaha Xaafadda u adeegto;

E. Maamulaan qandaraasyada iyo qoraallada isfahamka isla markaana hawlgeliyaan Isbahaysiga Degmada iyada oo la raacayo Heerarka yaala ee la ansixiyay; isla markaana

F. U hoggaansamaan Heerarka la raacayo ee uu dejiyay Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda.

3.96.50 Mas'uuliyada Hay'adaha Magaalada.

A. Hay'adaha Magaaladu waa in ay la socodsiiyaan dhammaan Ururada Xaafadda ee ay saameeyeen dadaalada dhanka wax qorsheynta ama tallaabooyinka kale ee saameynaya tayada nololeed ee Xaafadda(aha).

B. Hay'adaha Magaaladu waa in ay Ururada Xaafadda iyo Isbahaysiga Degmada ku daraan dadaalada dhanka wax qorsheynta ee saameynta ku yeesha tayada nololeed ee xaafadda.

C. Ogeysiinta go'aanada dhanka siyaasadda ee la ee saameynta ku yeelanaya tayada nololeed waa in la siiyaa Ururka(ada(Xaafadda ay saameysay ugu yaraan 30 maalmood ka hor tallaabada ugu dambeysa ee go'aanka ay gaarto hay'ada Magaaladu. Haddii la yiraahdo waqtiga 30 maalmood ah waxaa laga yaabaa in uu dhaawac ama waxyeello u keeno caafimaadka dadweynaha, ammaanka, wanaaga, ama culeys dhaqaalo oo weyn u keeno Magaalada, bixinta ogeysiintani ma aha in ay khusayso.

3.96.60 Mas'uuliyadaha Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda.

(Wax ka beddelka waxaa la sameeyay iyada oo la raacayo Sharciga Tirsigoodu yahay 186216 iyo 187359, ee dhaqan galay Sibtambar, 2005-kii.) Halkan waxaa lagu dejiyay isla markaana lagu abuuray Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda oo ka kooban Agaasime iyo sida shaqaalo kale sida La taliye oo mararka qaarkood laga yaabo in uu wax bixiyo. Si loo fududeeyo ka qayb qaadashada iyo wanaajinta xiriirka ka dhexeeya dadweynaha, Ururada Xaafadda, Ururada Ganacsiga ee Degmada, Isbahaysiga Degmada iyo Magaalada, Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda waa in ay:

A. Ka caawiyaan Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada iyo kuwa kale dhanka barnaamijyada qorsheynta iyo horumarinta ee loogu talagalay ka qayb qaadashada dadweynaha, ka hortagga dembiyada, xallinta khilaafaadka iyo dib u eegida miisaaniyadda;

B. Noqdaan meel lagu hayo macluumaadka iyo ilaha ku aadan Xaafadda iyo Ururada Ganacsiga, dadka kale iyo dadweynaha;

C. Dadka daneynaya kulamada, dhageysiyada, doorashooyinka iyo ka qayb qaadashada dhacdooyinka kale ee dadweynaha waa in ay la socodsiiyaan nidaamka xaafadda ee Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda;

D. Gelaan, la socdaan, maamulaan qandaraasyada, iyo qoraallada isfahamka ee loogu talagalay Ururada Xaafadda iyada oo la sii marayo Isbahaysiga Magaalada;

E. Dhiirigeliyaan isla markaana fududeeyaan xiriirada furan iyo ogeysiinta ka

socota hay'adaha Magaalada ee u socda Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada, iyo Ururada Ganacsiga ee Degmada, dhiirigelityaan isla markaana fududeeyaan xiriirka ka dhexeeya hay'adaha Magaalada ee ku saabsan ka qayb qaadashada dadweynaha ee waxqabadka wanaagsan iyo siyaasadda;

F. Taageeraan isla markaana dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada dadweynaha ee qaab-dhismeedka Ururka Xaafadda;

G. Ansixiyaan isla markaana dib u eegaan sida Heerarka la raacayo loo arko in ay lagama maarmaan ugu yihiin hirgelinta Xeerkan iyo qayb qaadashada dadweynaha ee haboon ee dowladda Magaalada iyada oo la sii marayo Ururada Xaafadda iyo Isbahaysiga Magaalada. Si sidaasi loo sameeyo, Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda waa in uu wakiilnimo ka raadiyaa Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Magaalada, Ururada Ganacsiga ee Degmada, bulshada kala duwan ee daneynaysa, hay'adaha magaalada ee ka qayb qaata hawlaha muhiimka ee dadweynuhu ka qayb qaadanayaan, iyo dadka kale ee daneynaya marka loo baahdo;

H. Tahay mid raacaysa Heerarka yaala ee la ansixiyay; oo si rasmi ah u aqoonsanaya Ururka Xaafadda iyo/ama jiritaanka Ururka Ganacsiga ee Degmada. Haddii Ururka Xaafadda ama Ururka Ganacsiga ee Degmadu ku guuldareysto in uu buuxiyo shuruudaha ugu yar ee xeerka 3.96, Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda waxaa laga yaabaa in uu joojiyo qayb ahaan ama dhammaan faa'iidooyinka isla markaana laga yaabo in ugu dambeyntii lagala noqdo aqoonsiga rasmiga ah ee Urur Xaafadeedka ama jiritaanka Ururka Ganacsiga ee Degmada;

I. Horumariyaan, dhiirigeliyaan isla markaana taageeraan ka qayb qaadashada dadweyne kala duwan isla markaana leh dhaqamada kala duwan;

J. Samaynta nidaamyada dhibaato tabashada (grievance procedures) oo furan isla markaana caddaalad ku dhisan oo loogu talagalay Ururada Xaafadda, Isbahaysiga Degmada, iyo Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda;

K. Samaynta nidaamyada dhibaato tabashada (grievance procedures) oo furan isla markaana caddaalad ku dhisan oo loogu talagalay Xafiiska Ka qayb qaadashada ee Xaafadda iyo Isbahaysiga Degmada;

L. Maamulayaan isla markaana fuliyaan Magaca Xeerka Magaalada 18, Xakameynta Buuqa; iyo

M. Waajibaadyada kale ee Xafiiska ay u xilsaartay Guddiga.